

## CAAWIMAAD MA UGA BAAHAN TAHAY DARYEEL BIXIYAHA CARRUURTA AMA ILO KALE?



- La xiriir 211info: **WAC** khadka bilaashka ah ee **211**
- Fariin u dir adigoo isticmaalaya kalmada **CHILDREN** una diraya **898211**
- Email u dir: **children@211info.org**
- Booqo **211info.org**

### Wakiilka 211info ayaa kaa caawin kara:

- Daryeelka carruurta
- Istaraatajyadaha hab-dhaqanka
- U diyaar garowga dugsiga iyo talooyin
- Korriinka carruurnimada ee hore
- Walwalka iyo walaaca qoyska
- Fasallada waalidnimida la xiriira iyo taageero
- Kooxaha ciyaarta ee degaanka
- Taageerada daryeelka ilmo korsiga
- Ilaha qoyska ee aasaasiga ah... **iyu kuwo kale oo badan!**



Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. La xiriir Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta 503-945-5944. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

Oregon Department of Human Services  
Office of Self-Sufficiency  
500 Summer Street NE E48  
Salem OR 97301-1073

DHS 0239 (09/2021) Somali

# TAAGEERADA DARYEELKA CARRUURTA

EE LOOGU TALAGALAY WAALIDIINTA SHAQEYSA



- Cidmaa u qalanta?
- Sida loo codsado
- Sida loo helo daryeel carruureed oo tayo leh



## WAXAA SUURAGAL AH IN AAD U QALANTO TAAGEERADA DARYEELKA CARRUURTA

Qoysaska shaqeynaya waxaa suuragal ah in ay helaan caawimaad la xiriirta kharashyada daryeelka carruurta ee bishii oo adeegsanaya barnaamijka Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta (ERDC). Qoys ka kooban saddex qof oo leh dakhliga ay sameeyaan oo ka yar \$3,386 bishii way u qalmi karaan. Xaddadka u yaala dakhliga ayay dhici kartaa in ay isbeddelaan sanad kasta. Si aad u aragto xaddadka u yaala dakhliga ee hadda jira, booqo [www.oregon.gov/DHS/assistance/CHILD-CARE/Pages/parents.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/assistance/CHILD-CARE/Pages/parents.aspx).

Lacagta kabista ee ERDC waxay caawimaad ka geysataa adeegyada daryeelka carruurta ee daryeel bixiyaha ay oggolaatay ODHS. Faa'iidooyin ay leedahay in la isticmaalo daryeel bixiyaha qoran ODHS waxaa ka mid ah:

- Daryeel bixiyuhu wuxuu ku gudbay soo baarida taariikh dembiyeedka iyo adeegyada badbaadinta carruurta.
- Daryeel bixiyaha ayaa qaatay tababaro faa'iido leh sida Aasaaska Daryeelka Carruurta ee Caafimaadka iyo Badbaadada.
- Daryeel bixiyuhu wuxuu diyaar u yahay in uu helo lacag bixin ka socota ODHS.



## SIDA BARNAAMIJKU U SHAQEEYO

Waxaad isticmaali kartaa noocyada kala duwan ee daryeel bixiyayaasha carruurta oo ay ku jiraan xarumaha ama daryeelka carruurta guriga ee qoyska ee ruqsada haysta. Waxaad isticmaali kartaa saaxiib ama qaraabo marka ay ODHS oggolaato ama isticmaali kartaa wax ka badan hal daryeel bixiye.

Marka loo qalmo, qoyska ayaa qaybta kaga soo aada kharashka daryeelka carruurta siiya daryeel bixiyahooda, oo loo yaqaan copayment. Waxay ku saleysan tahay tirada qoyska iyo dakhliga. Qoysku waa in ay sidoo kale bixiyaan kharashyada daryeelka carruurta ee ka sarreeya heerka lacagta u sareysa ee ODHS. Si aad u aragto qiyaasta copay-ga ee qoyska, booqo <https://www.oregon.gov/dhs/assistance/child-care/pages/parents.aspx>.

## SIDA LOO CODSADO

Waxaad ka codsan kartaa internet-ka, booqo xafiiskaaga degaanka ODHS ama ODHS ayaa boosta kuugu soo diri karta arji codsi ama ku soo wici karta si aad u qabsato ballan wareysi.

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan barnaamijka daryeelka carruurta ee ODHS ama si aad uga codsato internet-ka, booqo [www.oregon.gov/DHS](http://www.oregon.gov/DHS).

Waqtiyada barnaamijka ERDC laga yaabo in aanu lahayn wax boos ah oo bannaan. Marka ay tani dhacdo, qoysaska waxaa geliyaa Liiska Sugida ee ERDC. Shaqaalahaaga ODHS ayaa go'aamin doona haddii aad buuxinayso shuruudaha iska dhaafidda ee ku aadan liiska.

## BAARITAANKA KORRIINKA CARRUURNIMADA EE HORE

Baaritaanka korriinka la xiriira waxaa ka mid ah su'aalaha bixiya fikrad guud oo ku saabsan sida uu ilmuhu wax u baranayo, u korayo isla markaana u gaarayo korriinka muhiimka ah. Baaritaanka korriinka la xiriira waa waxyaabo caawimaad ka geysta qiimeynta in uu ilmuhu ka faa'iidayo karo baaritaanka ama adeegyada si ay uga caawiyaan waxbarashada.

Wixii macluumaad dheeraad ah weydii dhakhtarka ilmahaaga ama la xiriir Xarunta Waxbarashada Hore ee degaankaaga. Wixii la xiriira liiska goobaha xarumaha ah, booqo <https://oregonearlylearning.com/current-early-learning-hubs/>.

## MACLUUMAADKA DARYEEL BIXIYAHA

ODHS waxay ku weydiin doontaa magaca daryeel bixiyaha carruurtaada marka aad codsato ERDC. ODHS ayaa u baahan in ay oggolaato daryeel bixiyayaasha si ay u awoodaan in ay helaan lacag.

Haddii daryeel bixiyahaaga aanan la oggolaanin, daryeel bixiyahaagu wuxuu u baahan doonaa Foomka Liiska Daryeel Bixiyaha Carruurta. Daryeel bixiyayaashu waa in ay qaataan tababar ka hor inta aan la oggolaanin. Foomka Liiska Daryeel Bixiyaha Carruurta ayaa sharxaya tababarka loo baahan yahay.

Daryeel bixiyayaasha aanan ruqsada haysan isla markaana aan qaraabada la ahayn dhammaan carruurta daryeelka ku jirta waa in ay haystaan booqasho la dhammeystiray oo lagu aadaa goobta ay ku bixiyaan daryeelka ka hor oggolaanshaha. Tani waxaa ka mid ah halka daryeelka laga sameeyo ee guriga ilmaha dhexdiisa.



## SIDA LOO HELO DARYEEL CARRUUREED OO TAYO LEH

Doorashada daryeelka carruurta waa mid ka mid ah doorashooyinka muhiimka ah ee uu waalidku sameeyo. Daryeelka carruurta oo tayo leh wuxuu caawimaad ka geystaa horumarinta caafimaadka leh iyo dhanka guusha ee dugsiiga.

Goobta leh daryeel carruurteed oo tayo leh waxay bixisaa hawlaha dhanka horumarinta carruurta oo kale duwan oo muhiim u ah korriinka maskaxeed ee ilmahaaga iyo waxbarashada waqtiga dheer.

Daryeel bixiyayaasha qaarkood ayaa leh qiimeynta 'Spark'. Ahaanshaha daryeel bixiye tayo sare leh 'Spark' waxay tilmaamaysaa in daryeel bixiyuhu qaatay tababarka looga baahan yahay si ilmaha looga caawiyo in uu u diyaar garoobo dugsiiga sidoo kalena guuleysto dugsiiga dhexdiisa. Si aad u hesho daryeel bixiye tayo sare leh 'Spark' la xiriir 211 info.

